SIOUX CITY COMMUNITY SCHOOL DISTRICT

Qorshaha Dib-ugu-noqoshada Waxbarashada

2021-2022

Sioux City Community Schools

believe... achieve... succeed

Qorshaha Dib-ugu-Noqoshada-Waxbarashada ee Sioux City Community School District

Sioux City Community School District (SCCSD) wuxuu diyaariyay Qorshaha Ku-Noqoshada-Waxbarashada sannad-dugsiyeedka 2021-2022 sida ay farayso Waaxda Waxbarashada ee Iowa. Mareegta SCCSD waxaa ku jira macluumaad cusub oo ku saabsan habraacyada karantiilka iyo go'doominta iyo dhaqamada badqabka. Mareegta SCCSD waxaad ka heli kartaa halkan: https://www.siouxcityschools.org/.

Waxbarashada Wakhtiga buuxa, Fool-Ka-Foolka ah

Jadwal Dugsiyeedka 2021-2022 ee la qaatay iyo saacadaha dugsiga ee loo qoondeeyey (caadiga) ardayda iyo shaqaalaha ayaa la raacayaa.

Caafimaadka iyo Badqabka

Caafimaadka iyo badqabka ardayga iyo shaqaalaha ayaa mudnaanta koowaad ah. Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (Disease Control and Prevention, CDC) waxay ku taliyaan in dadku ku xirtaan afxiro gudaha dhismaha haddii ayna si buuxda u tallaalayn. Ardayda, shaqaalaha iyo booqdayaasha dugsiga ee aan tallaalayn waxa lagu boorin doonaa inay dugsiga u soo xirtaan afxir maalin kasta. Ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dugsiga u soo qaataan afxir. Afxirada waa loo heli doonaa cid kasta oo codsato. Waalidiintu iyagaa doorta haddii carruurtoodu xiranayso afxirada. Shaqaalaha degmo-dugsiyeedku waxay hubin doonaan in arday kasta oo doorta inuu xirto afxir uu nafis ku dareemayo go'aankiisa. Wadasheekaysiyada fasalka dhexdiisa ah way dhici doonaan kuwaasoo sare u qaada dulqaadka iyo aqbalaadda doorashooyinka ardayga.

SCCSD si guul leh ayuu ugu qabtay waxbarashada fool-ka-foolka ah ardayda sannad-dugsiyeedkii 2020-2021. Lakabyo badan ayaa la diyaariyey si loo hubiyo in badqabka ardayga iyo shaqaalaha uu horseedo sannad-dugsiyeed guulaysta. Sannad-dugsiyeedka 2021-2022 wuxuu ku bilaabmayaa habdhaqamadii nadaafadeed ee sii jiray ee la isticmaalayay sanad-dugsiyeedkii 2020-2021. Ardayda ayaa nadiifin doona miisaskooda ama xarumahooda waxbarasho kahor iyo kadib isticmaalka. Saadka nadiifinta ayaa la heli doonaa. Gacmo-nadiifiye ayaa laga heli doonaa fasal kasta iyo xafiis kasta. Waxaan la socon doonnaa hagista CDC waxaana ku sameyn doonaa isbeddel habraacyada markii loo baahdo. Meelaha taabashadu ku badan tahay ee dhismayaasha iyo fasalada waxaa loo nadiifin doonaa si isdaba joog ah inta maalinta lagu jiro oo nadiifinta buuxda lama xaddidi doono ilaa marka dhismaha la baneeyo kadib.

Dhammaan waalidiinta waxaa laga filayaa inay qaadaan heerkulka ilmahooda/caruurtooda kahor intaysan guriga ka tagin markay aadayaan dugsiga ama nashaadyada. Ardayda xanuusanaysa waa inay guriga joogaan inta ay astaamaha leeyihiin.

Hadduu ilmo ku xasuusado dugsiga, waxa jira laba tallaabo oo kala duwan oo la qaadi karo. Hadduu ilmuhu qufacayo oo u muuqdo inuu leeyahay qandho (calaamadaha COVID ee suurtagalka ah), ilmuhu waa in laga soo diraa fasalka isagoo afxir xiran loona diraa "qolka daryeelka". Ilmaha waa inaan loo dirin xafiiska uu ku badan yahay socodka. "Qolka daryeelka" ayaa lagu qalabeyn doonaa sahay iyo qalab si loo ogaado in ilmaha loo dirayo guriga. Kalkaalisada caafimaadka dugsiga ama kaaliyaha kalkaalisada caafimaadka ee la xaqiijiyay ayaa

ugu tagi doona “qolka daryeelka” waxaana la siin doona Qalabka Difaaca Shaqsiga (PPE, Personal Protective Equipment). SCCSD wuxuu qaadi doonaa baaritaanada COVID. Haddii ilmuhu qabo astaamaha COVID, waalidka ayaa lala xiriiri doonaa oo haddii waalidka ama wakiilka oggolaado, baaritaanka COVID ayaa lagu samayn doonaa ardayga. Natiijada baaritaanka COVID waxaa lala wadaagi doonaa waalidka. Haddii la go'aamiyo in ilmaha loo diro guriga, waalidka ayaa laga filayaa inuu yimaado dugsiga si uu u qaado ilmahiisa jirran iyo inuu ka caawiyo kahortagga ku faafida suurtagalka ah ee COVID ee dhismaha. Ardayda la xanuunsan astaamaha kale ee aan COVID ahayn waxaa loo diri doonaa xafiiska marka ay jirran yihiin.

Taxaddar kale oo badqab ee bilowga sannadka ayaa xadididdaya gelidda dhismayaasha. Waalidiinta iyo mutadawiciinta ma awoodi doonaan inay soo booqdaan fasalada taxaddar caafimaad iyo badqab ahaan. Gelitaanka wakaaladaha dibedda waxaa loo go'aamin doonaa si kiis-ka-kiis ah.

Shaqaalaha Taageerada

SCCSD wuxuu kordhiyay tirada la-taliyayaasha hagista ee ka shaqaynaya Degmada laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2021-2022. La-taliyayaasha hagista ee dheeraadka ah waxay taageerooyin siinayaan ardayda waxayna sidoo kale isku duwayaan taageerooyinka dheeraadka ah ee ardayda loogu talogalay. SCCSD wuxuu qorsheeyay inuu kordhiyo tirada dhakhaatiirta caafimaadka dhimirka ee dugsiga joogaan ee ka shaqeeya dhismayaasha iyadoo loo marayo iskaashigayaga joogtada ah ee aan la leenahay hay’adaha caafimaadka dhimirka iyo bixiyayaasha. La-taliyayaasha hagista waxay xiriir la sameeyaan dhakhaatiirta caafimaadka dhimirka iyagoo ka codsanaya taageero dheeraad ah oo loogu talogalay ardayda.

Si loo yareeyo tirada ardayda fasalka oo loo kordhiyo kala fogaanshaha dadka, SCCSD wuxuu qorsheyay inuu shaqaalayso, in muddo ah, shaqaale dheeraad ah haddii ay jiraan fasallo diyaar ah oo laga heli karo dhismayaasha oo ay jiraan codsadayaal tayadoodu sarrayso oo loogu talagalay shaqooyinka bannaan. Tirada ardayda fasalka ee dugsiga hoose waxay celcelis ahaan noqon 18 arday fasalada barbaarinta, 20 arday fasalka koowaad, 22 arday fasalka labaad, 24 arday fasalka saddexaad, 26 arday fasalka afaraad iyo 28 arday fasalka shanaad. Xubno shaqaale oo dheeraad ah ayaa loo shaqaalaysiin doonaa koorsooyinka muhiimka ah ee dugsiga dhexe. Iyadoo la adeegsanayo shaqaalaha dugsiga dhexe ee dheeraadka ah, dugsiyada dhexe waxay awoodi doonaan inay ku halwgalaan kooxo dhammaystiran. Fasalada muhiimka ah ee dugsiga sare waxay tirada ardayda fasalku noqon doontaa wax ka yar 30.

SCCSD wuxuu sii wadayaa inuu siiyo quraac iyo qaddo bilaash ah muddada sannad-dugsiyeedka 2021-2022 dhammaan ardayda ka diiwaangashan Degmada.

U-diyaargarowga Waxbarashada iyo Wax-ka-Qabashada Khasaaraha Waxbarasho

Bilawga sannadka, ardayda waxaa la bari doonaa caadooyinka iyo habraacyada dugsiyeed ee soo jireenka ah. Caadooyinka iyo habraacyada dugsiga waxaa ka mid ah: Filashooyinka Taageerada Wax-ka-Qabasho ee Habdhaqanka Wanaagsan (PBIS, Positive Behavior Intervention Support), farsamooyinka gacmo-dhaqida habboon, habraacyada nadiifinta miiska iyo goobta shaqada, adeegsiga iimaylka Outlook, ku soo biirida kulamada Teams, si habboon uga qaybqaadashada muddada la bixinayo waxbarashada iyadoo la adeegsanayo Teams, gelitaanka “bogga hore” ee Degmada ee leh barnaamijyada/app-yada ay Degmadu taageerto lana

adeegsado inta badan, helitaanka iyo adeegsiga app-ka Canvas ama Seesaw, iyo adeegsiga miiska caawinta si loo gudbiyo su'aalo ama dhibaatooyin farsamo ah.

Bilowga sannadka, dhammaan shaqaalaha waxay heli doonaan dukumiinti dhigayo mawduucyada iyo xirfadaha ugu waaweyn ee ardayda aysan baran inta lagu gudajiray sannad-dugsiyeedka 2019-2020 ee iyadoo ugu wacan tahay xiritaanka dugsiyada. Dukumintigani wuxuu ka siinayaa macallimiinta fahamka ku saabsan farqiga waxbarasho ee dhacay xilliga xiritaanka.

Inta lagu gudajiro bisha koowaad ee sannad-dugsiyeedka 2021-2022, tijaabooyin ayaa la marsiin doonaa, iyadoo falanqayn lagu sameyn doono xogta si loo go'aamiyo heerka waxbarasho iyo aqoonta sare ee ardayda. Tijaabada soo socota waxaa loo isticmaali doonaa in lagu qaato go'aamada barnaamijyada iyo meelaynta: IGDI-yada akhriska-qoraalka iyo xisaabta ee loogu talagalay ardayda dugsiga barbaarinta, tijaabada akhriska-qoraalka ee FAST ee ardayda fasalada TK-5, Tijaabada xisaabta ee FAST ee ardayda fasalada T-5, Tijaabada xisaabta BME ee Degmadu soo saartay ee ardayda fasalada 6-12. Tijaabda boobsiinta akhriska-qoraalka ee fasalada 6-8, tijaabada qoraalka ee Jawaabta Furan ee fasalada 9-12 iyo tijaabada Degmadu horay u soo saartay ee akhriska-qoraalka ee ardayda fasalada 2-12. Natiijooyinka tijaabada waxaa lagula wadaagi doonaa waalidiinta shirarka waalidiinta-macallinka ee deyrta.

Si loo soo buuxiyo qaar kamid ah waxbarashadii khasaartay markii dugsiga la xiray ee 2020, iyo kala go’ii waxbarasho ee 2020-2021, waxbaris gaar ah iyo taageerada shaqada guriga marka dugsiga laga rawaxo ayaa la siin doonaa ardayda tacliin ahaan hooseeyaan, ardayda doorata inay helaan taageero dheeraad ah iyo ardayda ku dhaca koorsooyinka. Waxbarista kadib ka rawaxaadda dugsiga iyo taageerada shaqada guriga ayaa la bixin doonaa sannad-dugsiyeedka 2021-2022, sannad-dugsiyeedka 2022-2023 iyo sannad-dugsiyeedka 2023-2024. Codsi Qorshe ayaa loo diyaarin doonaa gudaha dayrta 2021 wakaaladaha dibadda si ay u soo gudbiyaan qorshe si ay u siiyaan taageero ardayda oo qaabka waxbarista dugsiga kadib ah iyo taageerada shaqada guriga.

Sidoo kale si loo soo buuxiyo qaar ka mid ah waxbarashadii ka khasaartay xiritaankii dugsiga ee 2020, iyo kala go’ii waxbarasho ee 2020-2021, waxbarashada xagaaga ayaa la bixin doonaa iyadoo la isticmaalayo lacagaha ESSER III muddada xagaayada 2021, 2022 iyo 2023. Ardayda dugsiga hoose ee hesha darajo ka hoosaysa tan caadiga ah ee dhanka akhriska ama xisaabta waxa lagu boorin doonaa inay xaadiraan waxbarashada xagaaga ee dugsiga hoose. Ardayda dugsiga dhexe ee hesha darajo ka hoosaysa tan caadiga ah ee dhanka akhriska iyo xisaabta iyo/ama ku dhacaya maaddooyinka muhiimka ah waxaa lagu martiqaadi doonaa inay xaadiraan waxbarashada xagaaga ee dugsiga dhexe. Ardayda dugsiga sare ee ku dhaca maaddooyinka waxa lagu martiqaadi doonaa inay xaadiraan waxbarashada xagaaga ee dugsiga sare.

Tiknoolojiyada

SCCSD wuxuu siiyaa laabtoobyo dhammaan ardayda fasalada 6-12. Laabtoobyada ayaa laga geli karaa internet-ka waxaana lagu istcimaali karaa dugsiga iyo guriga. SCCSD wuxuu bixiyaa aalado loogu talagalay ardayda ku jirta TK-5 si ay shaqsi ahaan ugu isticmaalaan. Ma jiri doonto baahi loo qabo in la wadaago aaladaha. Agabyo dheeraad ah, sida agabka wax-ka-qabasho ama khalkhaalinta, ayaa la heli doonaa si loo yareeyo baahida in agabka la wadaago.

Xarun wicitaan ayay heli doonaan ardayda, waalidiinta iyo shaqaalaha si ay u helaan su'aalaha tiknoolojiyadda la xiriira. Xarunta wicitaanka waxaa la heli doonaa inta u dhaxaysa 7:00 subaxnimo iyo 7:00 galabnimo.

Waxbarashada Fogaan-Aragga ah

Waxbarashada wakhtiga buuxa ee fool-ka-foolka ah waxaa u beddeli karaa waxbarashada fogaan-aragga ah iclaamka barasaabka ee xaaladda gurmadka ee la xiriirta COVID-19, haddii loo baahdo.

SCCSD wuxuu bixiyaa ikhtiyaar waxbarashada fogaan-aragga ah. Waalidiinta doorta ikhtiyaarka waxbarashada fogaan-arraga ah sannad-dugsiyeedka 2021-2022 waxay ka diiwaangalin karaan ilmah-a(ooda) VIBE Academy Virtual School.